

# Early Achievers Accreditation Policy (Siyaayada Siinta Shahaadada Early Achievers)



## Waa maxay aqoonsigu?



Aqoonsigu waxaa weeye nidaam ikhtiyaar ah oo lagu qiimeeyo adeyada iyo shaqooyinka barnaamijyada waxbarashada hore, lagu xaqiijiyo oo ay ku aqoonsato cid banaanka ah taas oo eegta hadii uu buuxiyay shuruudaha u degsan. The Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarta iyo Qoysaska, DCYF) waxay soo gelisay aqoonsiga qaran qaar Early Achievers. Siyaasadan waxaa ku qoran aqoonsiyada la bixiyo iyo faahfaahinta nidaamka lagu dalbado qiimaynta aqoonsiga.

## Siyaasadan waxay ku khusaysaa:

Ka qayb galayaasha haysta aqoonsiga buuxa ee Early Achievers. Ka qayb galayaashu waa inay ka haystaan aqoonsi\* hay'adaha iyo barnaamijyada ay aqoonsadeen Kooxda Naqdinta Aqoonsiga Early Achievers, oo ka kooban kuwa soo socda:

- ✔ National Association for the Education of Young Children (Ururka Heer Qaran ee Waxbarashada Caruurta Yaryar, NAEYC) <https://www.naeyc.org/accreditation/early-learning-program-accreditation>
- ✔ National Association for Family Child Care (Ururka Heer Qaran ee Waxbarashada Caruurta Yaryar, NAFCC) <https://nafcc.org/accreditation/>
- ✔ American Montessori Society (Ururka Farsamada Gacanta Maraykanka, AMS) <https://amshq.org/Educators/Montessori-Schools/AMS-Accreditation>
- ✔ National Accreditation Commission (Gudida Aqoonsiga Qaran ee Barnaamijyada Daryeelka Hore iyo Waxbarashada (Gudida Aqoonsiga Qaran NAC) <https://www.earlylearningleaders.org/accreditation/accreditation-process/>
- ✔ Aqoonsiga Waxbarashada Hore ee Cogna <https://www.cognia.org/accreditation/>
- ✔ Shahaadooyinka aqoonsiga ee Department of Defense (Wasaarada Difaaca, DOD) <https://www.militaryonesource.mil/leaders-service-providers/children-youth-and-teens/accrediting-organizations/>

\* Fadlan oggaw: Waraaquhu waa inay muujinayaan aqoonsiga buuxa. Xubinimada hay'ad ee aan buuxin shuruudaha aqoonsiga.

## Goorma ayuu dalbanayaanka qayb galayaashu naqdinta aqoonsiga?

Barnaamijyada la aqoonsaday waa inay soo gudbiyaan si loo naqdiyo oo loo aqoonsado shahaadadooda aqoonsiga wakhti ka danbeeya marka ay helaan dhibco Muujinta Fiidyawga ee labaad. Qaybaha Aqoonsiga waxaa kaliya la gudbin karaa hal Wareeg Aqoonsi mar.

## Maxay u dalbanayaan ka qayb galayaashu naqdinta aqoonsiga?

Siyaasada aqoonsiga Early Achievers waxay aqoonsataa barnaamijyada muujinaya dadaal inay ugu qalmaan nidaamka aqoonsiga. Barnaamijyada la siiyay aqoonsigu waxay heli doonaan 10 dhibcood ee kale oo Heerka Aqoonsiga Tayadooda ah.

Kuwa u qalma inay ka qayb galayaan ee hela dhibcaha dheeraadka ah, Aaga Aqoonsiga ee Gaarka ah waxaa kamid ah shahaadooda aqoonsiga.

## Sidee ayuu ka qayb gale u heli karaa dhibcaha aqoonsiga?

Si uu u helo ka qayb gale dhibcaha aqoonsiga waa inuu:

- ✔ Kusoo gudbi Codsiga Shahaadada Aqoonsiga Coach Educator Community Interface (Nidaamka Macalinka Tobobaraha Bulshada, CECl).
- ✔ U soo gudbi caddayn ahaan shahaado hadda ama dukumentiyada kale oo sheegaya in xarunta ay si buuxda u aqoonsatay hay'ad buuxisay shuruudaha aqoonsiga Early Achievers.
- ✔ Aqoonsigu waa inuu ansax noqdaa taariikhda la soo gudbiyay Codsiga Shahaadada Aqoonsiga.

Ka eeg Tilmaamaha Shaqada ka Qayb Galaha Early Achievers (<https://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/ea/OperatingGuidelines.pdf>) wixii macluumaad dheeraad ah. Haddii aad qato wax su'aalo ah, fadlan kala xidhiidh tobobarahaaga, wakiilkaaga bulshada, sanduuqa QRIS [QRIS@dcyf.wa.gov](mailto:QRIS@dcyf.wa.gov), ama sanduuqa Ka Faa'idaysiga Waxbarashada ee [CQEL@uw.edu](mailto:CQEL@uw.edu).

*DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, meesha uu kasoo jeedo ama xaalada soo galaytiga, da'da, rabitaanka galmada ama aqoonsiga jinsiga, ciidanka hawlgaay ama ciidanka, xaalada hooyada naas nuujinaysa, iyo jiritaanka wixii laxaad la'aan jidh, dareen, ama maskaxdeed ama isticmaalka ayda ama xayawaanka ruuxa haga. Haddii aad rabto nuqullo dhukumanti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhiyaha Qaybaha Taleefanka) 1-800-723-4831 ama iimaylka [communications@dcyf.wa.gov](mailto:communications@dcyf.wa.gov).*

DCYF PUBLICATION EL\_0089 SM (09-2024) Somali



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**